# Dib u Celiska Canshuurta Minnesota ee Carruurta Waaweyn ee Uqalma:Caawinta qoysaska iyo carruurta!



**Dib u Celiska canshuurta Carruurta Waaweyn ee U Qalma wuxuu keenayaa dhimista cashuurta dadka leh carruur. Canshuur dhaafida wuxuu yareyn karaa cashuurta lagugu leeyahay wuxuuna ku siin karaa lacag celin.**

## Ma u qalmaa Canshuurta Dib u Celinta ee U Qalanta Carruurta Waaweyn?

Guud ahaan, waa inaad buuxisaa shuruudahan si aad u dalbato Canshuur celiska Carruurta ee Waaweyn ee u Qalmata:

- Waxaad ahayd deggane buuxa ama mid qayb kamid ah sannadka 2025 ee Minnesota (iyadoo qaarkood laga reebayo xubnaha milatariga)
- Ma tihid qof ku tiirsan qof kale.
- Waxaad leedahay mid ama in ka badan oo "carruur waaweyn ee u qalma" sida ee qeexayday IRS

## Taasi waa imisa?

Canshuur celiska ugu badan waa:

- $1,000 oo loogu hal carruur weyn oo u qalma
- $2,270 oo loogu laba carruur waaweyn oo u qalma
- $2,710 oo loogu saddex carruur waaweyn oo u qalma

Canshuurta dib u celisku wuxuu ka baxayaa haddii dakhligaagu ka badan yahay $31,950 dadka shaqsiga ah ee faylka canshuurta buuxiya iyo $37,910 dadka is qaba ee faylka canshuurta wadajirka ah buuxiya.

## Sideen U Codsan Karaa?

Dalbo dib ucelinta Canshuurta Carruurta adiga oo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, *Dib ucleinta canshuurta Carruurta iyo Qoysaska Shaqaalaha ee Minnesota*.

Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa diyaarinta canshuur celinta oo lacag la'aan ah! Booqo **www.revenue.state.mn.us** oo gal diyaarinta canshuurta la'aanta, fiiri sanduuqa Raadinta si aad u hesho adeegyada diyaarinta canshuurta lacag la'aan ah oo kuu dhow.

DEPARTMENT OF REVENUE

Somali — Rev. 8/25